Sidee ayuu khiyaanada daryeel-ka caafimaadku u dhacaa?

"Wakiil" ayaa ku soo waca isagoo ku siinaya dhiirrigelin-laga yaabee qalab dhabarka ama jilibka lagu xirto oo bilaash ah. Waxa kaliya ee ay u baahan yihiin waa lambarkaaga Medicare. Marka hore waxay u muuqan kartaa wax aan dhib lahayn, balse tani waa isku day khiyaano ah waxayna keeni kartaa xatooyo aqoonsi.

Ha aqbalin qalab ama agab caafimaad haddii uusan dhakhtarkaagu kuu qorin. Weligaa ha la wadaagin lambarkaaga Medicare qof qalaad oo ku soo waca si uu u weydiisto.

Adiga iyo Medicare ilaalinaya

Warka wanaagsan waa in adigoo raacaya talooyin fudud, aad iska ilaalin karto noocyadan khiyaanada ah. Xusuusnow inaad **is ilaaliso, ogaato**, oo aad **warbixiso** taas oo caawinaysa qof walba, adiga iyo dadka aad jeceshahayba

SHIBA OFFICE of the INSURANCE COMMISSIONER WASHINGTON STATE

Waxaa maamula barnaamijka La-taliyeyaasha Faa'iidooyinka Caymiska Caafimaadka ee Gobolka oo Dhan (Statewide Health Insurance Benefits Advisors, SHIBA) ee Washington state Office of the Insurance Commissioner. Ilaalada Medicare Sare (Senior Medicare Patrol, SMP) waxay ka caawisaa ka-faa'iideystayaasha Medicare iyo Medicaid inay ka fogaadaan, ogaadaan, kana hortagaan khiyaanada, khaladaadka iyo ku-xadgudubka daryeelka caafimaadka.

Waa maxay Barnaamijka SMP?

Senior Medicare Patrol (SMP) waa barnaamij qaran oo loogu talagalay dadka leh Medicare da' kasta ha ahaadeene. SMP waxaa maamula ee Administration for Community Living. Si aad wax badan u ogaato ama aad iskaa wax u qabso uga noqoto, booqo www.insurance.wa.gov/medicare.

Daabacaadan waxaa taageeray Maamulka Nolosha Bulshada (Administration for Community Living, ACL), Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka (U.S. Department of Health and Human Services, HHS) taasoo qayb ka ah deeqda kaalmo lacagta ah oo dhan $630,011.00 iyadoo 100 boqol ay maalgalinayso ACL/HHS. Waxaa ku jira waa kuwa qoraaga(yaasha) ma matalaan aragtida rasmiga ah ee, ama taageerada, ACL/HHS, ama Dawlada Maraykanka.

SMP Senior Medicare Patrol
Preventing Medicare Fraud

SHP 864-SHIBA-Is Ilaali iyo Medicare -02/2026

IS ILAALI OGAAN WARBIXI

SMP Senior Medicare Patrol
Preventing Medicare Fraud

IS ILAALI NAFTAADA iyo MEDICARE

Caymiska Caafimaadka Gobolka oo Dhan La-taliyeyaasha Faa'iidooyinka (SHIBA)
1-800-562-6900
www.insurance.wa.gov/medicare

IS ILAALI

Naftaada ka ilaali Khiyaanada Medicare.
Ilaalinta macluumaadkaaga gaarka ah waa difaacaaga ugu wanaagsan ee ka hortagga khiyaanada iyo ku-xadgudubka daryeelka caafimaadka.

Tallaabooyinka aad iskaga ilaalinayso naftaada iyo faa'iidooyinkaaga caafimaad

- Ula dhaqan lambarradaada Medicare iyo Sugnaanta Bulshada sida aad ula dhaqanto kaararkaaga deynta. Weligaa ha siin lambarradan qof qalaad.
- Xusuusnow, Medicare kuuma soo wici doonto si ay u weydiiso lambarkaaga Medicare.
- Ha sidanin kaarkaaga Medicare haddii aadan ugu baahnayn ballan dhakhtar.
- Diiwaan geli booqashooyinkaaga caafimaad, baaritaannada, iyo habraacyada ku samee buug xusuus-qor ama kalandar caafimaad.
- Kaydi warqadahaaga Medicare, sida Ogeysiisyada Soo-koobidda Medicare iyo Sharaxaadaha Faa'iidooyinka.

OGAAN

Ogow khiyaano suurtagal ah, khaladaad, iyo ku-xadgudub.
Ogaanshaha sida loo aqoonsado falal shaki leh waxay kaa caawin kartaa inaad joojiso khiyaanada iyo ku-xadgudubka daryeelka caafimaadka markiiba.

Tallaabooyinka lagu ogaanayo khiyaano, khaladaad iyo ku-xadgudub suurtagal ah

- Dib u eeg warqadahaaga Medicare si aad u hubiso khaladaad adigoo la barbar dhigaya diiwaankaaga gaarka ah.

Ka raadi saddex arrimood warqadahaaga Medicare:

1. Lacag lagugu dalacay wax aadan helin.
2. In hal adeeg ama agab lagugu dalacay laba jeer.
3. Adeegyo uusan dhakhtarkaagu qorin.

WARBIXI

Ka warbixi khiyaano, khaladaad iyo ku-xadgudub aad ka shakido.
Haddii aad ka shakido in lagu bartilmaameedsaday khiyaano, ka warbixi. Tani waxay kaa caawin doontaa adiga iyo dadka kale ee halista ugu jira khiyaanada caafimaadka.

Tallaabooyinka lagu warbixiyo dhaqan shaki leh

- Haddii aad hesho wicitaan shaki leh, ha bixin wax macluumaad shakhsiyeed ah. Si degdeg ah uga warbixi wicitaanka xafiiska SMP ee deegaankaaga.
- Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan warqadahaaga Medicare, wac bixiyahaaga adeegga caafimaad ama qorshahaaga.
- Haddii aadan ku qanacsanayn inaad wacdo bixiyahaaga caafimaad ama aadan ku qanacsanayn jawaabta, wac SMP-ga deegaankaaga. Dhammaan wadahadalladu waa qarsoodi.